

21 January 2008

Ardeyda iyo Waalidiinta / Daryeelayaasha Sharafta leh:

Guddoonka Dugsiyada Degmada Toronto (GDDT), waxay maanta ogeysiis ku bixiyeen hirgalinta khadka telefoonka, 416-395-SAFE (7233) ee hoggaanka nabadgalyada ardeyda.

Inkasta oo ardeyda aan ku dhiirigalinayno, inay waayeelka ay ku kalsoon yihiin lahadlaan, Haddana GDDT waxay aasaaseen, khadka telefoonka ee Nabadgalyada (Badbaadada) Ardeyda si loogu hirgaliyo Qorshaha ardeyda lagu kaalmeynaya inay gudbiyaan arrimaha dugsiga la xiriira ama qof-ahaaneed oo ku saabsan nabadgalayada.

Khadka telefoonka ee Nabadgalayada Ardeyda ee GDDT waa mid sir ah. Farrimaha oo dhan waa kuwa qarsoodi ah ama daahsoon (Anonymous) inuu ardeydu doorbido in magaciisa/da ama xogtooda gaar-ahaaneed ay fariinta ku dhaafaan ma-ahaane. Xogta oo dhanna waxaa loogu dhaqmi-doonaa, hab kalsooni ah ama sir ah. Ardeydu waxay awoodi karaan, inay fariin codkooda ah ay ku duubaan khadka nabadgalyada ardeyda, iyagoon cidina garanin ama ogaanin qofka ay yihiin.

Maamulka dugsigu wuxuu ardeyga/da la socodsiin-doonaa, mudnaanta uu u leeyahay khadka (telefoonka) nabadgalayada ardeyda ee GDDT. Xogwarran dheeraad ah oo ku saabsan Khadkan Nabadgalayada Ardeyda waxaad ka heli kartaan, xafiiska dugsiga ama Internetka GDDT oo ah: www.tdsb.on.ca/395SAFE. Waxaana jiridoona fursado aad ku falanqeyn-doontaan arrimaha nabadgalyada dugsiga marka Dugsigiina lagu qabanayo shirka Guddiga Dugsiga.

Waxaanu aaminsan-nahay in Khadka Nabadgalyada Ardeyda inuu nagu kaalmeyo, in nabadda dugsiyadeenu ay sii kordhaan oo fiicnaadaan, iyo inay ahaadaan bi'a waxbarasho oo daryeel badan leh, si ay dhamaan ardeydeenu awoodan inay guul gaaraan.

Yours truly,
John Campbell, Chair of the Board

Yours truly,
Gerry Connelly, Director of Education

Waxaa-muhiim ah (Important): Marka arrin deg-deg ah ay dhacdo, ardeydu waa inay wacan 9-1-1. Ardeydu waxay wici karaan, Telefoonka Kaalmada caruurta (Kids Help phone) , (1-800-668-6868), si ay u helaan talo lagu kalmeyo (Counselling Support), Soo-gudbinta xogwarran ku saabsan Dambiyada, ardeydu waxay awoodi karaan inay wacaan **Kahortagga Dambiyada Toronto (Toronto Crime Stoppers)** (416-222-TIPS); Khadka Nabadgalyada Ardeyda ee GDDT (416-395-SAFE), wuxuu siinayaa fursad kale oo ay ku gudbinayaan arrimaha la xiriira Nabadgalyada dugsiga.

